

Juun 1, 2018, qiimaha baska lagu raaco hoos ayuu u dhacayaa degmada Härnösand. Kaarka cusub ee Härnösand qiimuhu waa 50 karoon oo ah muddo 30 maalmood ah.

Marka qiimaha cusub la soo saaro, mar dambe bilaash ma aha Centrumlinjen iyo sabtida. Juun 1 deeda kadib qof kastaa wuxuu u baahan yahay kaarka Härnösand ama tigidh kale si u uraaco baska.

Juun 1, 2018 waxaa sidoo kale jiri doona baska bilaashka ah ee carruurta iyo dhallinyarada 7-19 sano. Tani waxay u baahan tahay inaad haysato kaarka carruurta ee aad ka codsaneyso [www.harnosand.se/barnkortet](http://www.harnosand.se/barnkortet)

Kaarka Härnösand iyo kaarka caruurta si xadid la aan ah ayaad ugu raaci karta basaska degmada Härnösand.

waxay sidoo kale khuseeyaan khadadka 50, 90 iyo 201 haddii safarka laga bilaabo oo lugu joojiyo degmada Härnösand. Laakiin ma khuseeyaan Y-baska ama gaadhiyaasha lasii dalbado.

## Kaarka Härnösand

Kaarku waa 50 karoon mudo 30 maalmood ah.

Kaarka waxaa laga iibsan karaa baska, COOP Forum iyo Hellstrands Tobak. Kaarka waxaa lagu soo daabici karaa websaydhka ([www.dintur.se](http://www.dintur.se)), baska, COOP Forum iyo Hellstrands Tobak.

Si aynu safku u dheeraanin isku day inaad ka iibsan ama kasoo dejisanin baska dhexdiisa.

Qofka horayba u haysta kaarka waqtiga ah uma baahna kaar cusub laakiin wuxuu kaadhkiisa soo gashan kara nooca cusub ee kaarka Härnösand (Härnösands kortet) 1-da Juune laga bilaabo.

## Kaarka caruurta

waa u bilaash qofkasta 7-19 jir ah.

Waxaad ka dalban kartaa websaytka, kaas oo aad ka heli karto  
[www.harnosand.se/barnkortet](http://www.harnosand.se/barnkortet).

Codsaduhu waa in uu ka weyn yahay 18 sano jir waana inuu haysto aqoonsiga elektarooniga ah.

Kaararka waaxaa loogu diraa codsadaha bostada.

Xaaladaha caadiga ah, wakhtiga wax qabadku waa ilaa 4 maalmood.

Kaarka lumay ama xumaaday waa la beddeli karaa. Waxaad u dalbataa kaadh cusub sidii kii hore. Kaarka beddelka ah waa 200 karoon.

Hadii aad u baahan tahay caawimaad dalabka ama aad qabto su'aalo kale, u dir email [barnkortet@harnosand.se](mailto:barnkortet@harnosand.se) ama wac 0611-34 81 59 (saacadu markay tahay 8-12 ).